State Government Victoria
Department of Education and Early Childhood Development

*'Shaqo ku barashada indha-indhaynta'*

# Waayo-aragnimada shaqada

Tusaha loogu talagalay Ardayda, Waalidiinta iyo Daryeeleyaasha

Work Experience - Somali

## Waa maxay waayo-aragnimada shaqada?

Waayo-aragnimo shaqo waa qayb ka mid ah barnaamijka waxbarashada dugsiga halkaas oo ay ardaydu waayo-aragnimo ka helaan nolosha shaqada, badanaa marka kowaad. Waa xilli gaaban oo shaqo ku-meelaynta ardayda dugsiga sare loo shaqeeyeyaasha, si ay faham uga helaan warshadaha, iyo goobta-shaqada ee lagu qoray. Ardayda waxaa lagu meeleeyaa loo-shaqeeyeyaal guud ahaan inay indha-indheeyaan oo wax ka bartaan – ee maahan inay qabtaan howlo kuwaas oo u baahan tababar iyo khibrad ballaaran. Waxaa lagu qaataa goobta loo-shaqeeyaha waxaana ugu jirta faai'dooyin badan ardayda maaddaama ay siinayso fursad ayaga inay:

- Ka dhinac shaqeeyaan dadka waaweyn ayagoo qayb ka ah koox oo ka helaya fahamka shaqada
- Sameeyaan iyo inay ku tababartaan xirfadaha cusub
- Noqdaan kuwo madax-bannaan oo isku kalsoon
- La-xiriiriyaan manhajka dugsiga goobta-shaqada
- Kordhiyaan dhiirigelinta sii wadidda daraasadooda ayna sii qaataan tababar dheeraad ah
- Sahmiyaan khiyaarada mihnadaha

Macalin ayaa la xiriiraya ardayda intay ku jiraan shaqo-gaynta waalidiintana waxaa lagu soo dhawaynayaa inay la soo xiriiraan dugsiga haddii ay qabaan wax dareen ah. Faahfaahinaha xiriirada waxay ku yaalliin bogga ugu dambeeya.

## Goorma ayaa la samayn karaa waayo-aragnimada shaqada?

Waayo-aragnimada shaqada waxaa badanaa la qaataa Sanooyinka 9aad iyo 10aad. Waqtigu wuxuu ku xidhan yahay dugsiga. Dugsiyo badan ayaa waqti u sameeya, kuwo kalena waxay fasaxaan kooxo arday ah sannadka dhexdiisa dugsiyada qaarkoodna waxay ku dhiirigeliyaan ardayda inay shaqo ku-qoridooda ku aadistaan fasaxa dugsiga.


Ardaydu waxay samayn karaan waayo-aragnimada shaqada ugu badnaan 10 maalmood halkii teeramba ama 40 maalmood sannadkiiba.

## Sidee ayey waalidiintu u caawin karaan?

Waa waqti xiiso badan markii uu wiilkaagu/gabadhaadu marka ugu horreysey galo caalamka shaqada ayadoo loo marayo Waayo-aragnimada shaqada. Waxaa jira dhowr waxyaalood oo aad samayn karto si aad uga caawiso arintan:

- Ku caawi ilmahaaga inuu fahmo dhanka wanaagga ee loo-shaqeeyaha ee bixinta shqo ku-qoridda.
- Ku dhiirigeli ilmahaaga si uu u helo rajooyin macquul ah oo ku saabsan nooca shaqada ay qaban doonaan. Ilmahaagu ma awoodi doono inuu shaqada qabto, hase ahaatee wuxuu qaban karaa shaqooyin fudud ka dib tababar habboon asagoo mar kasta la kormeerayo. Maalmahu way ka dheer yihiin maalmaha dugsiga.
- Si sax ah u buuxi foomka Diyaarinta Waayo-aragnimada Shaqada una soo-celi si degdeg ah dugsiga. Loo-shaqeeyaha iyo ardayguba waxay heli doonaan koobi dugsiguna wuxuu haysan doonaa koobiga asalka ah.
- U-sheeg dugsiga wixii caafimaad ah kuwaas oo saameeya Waayo-aragnimada Shaqada ilmahaaga.
- Kala hadal ilmahaaga wax ku saabsan muhiimadda OHS iyo masuuliyadooda. Weydii inaad eegto shahaadada safe@work oo dusigoodu siiyey ardayda, isla markii ay dhammaystiraan cutubkii looga baahnaa iyo ka hor intaysan bilaabin Waayo-aragnimada Shaqada.
- Ku caawi ilmahaaga inuu diyaarsado safar ammaan ah ee ka imaanshaha shaqada.
- Kala hadal ku-meelayntaWaayo-aragnimada Shaqada ee ilmahaaga gacanna ka gayso wixii dhibaatoioyin jira ama la dareensan yahay.
- Wargeli si degdeg ah dugsiga haddii ilmahaagu ka maqan yahay shaqada ama dhibaatooyin ka haystaan shaqo ku-qoridda.
- Kala hadal ilmahaaga wax ku saabsan shaqada iyo mihnadaha. Ku dhiirigeli inay ka fiirsadaan khiyaaro badan intii suurtagal ahba.
- Kala hadal isuduwaha mihnadaha ee ilmahaaga oo dugsiga jooga.

Ilmo kasta ha helo fursad kasta




## Waa maxay rajooyinka ardaydu?

Xoog-saaristu inta lagu jiro Waayo-aragnimada shaqada mar kasta waa isku dayidda inay siiso shaqo ku-meelayn xiiso iyo qiimo leh. Si loo hubiyo waayo-aragnimo waxbarasho qiimo leh, dhowr diyaarin oo loo baahan yahay iun la sameeyo. Ardayda waxaa lagu dhiirigeliyaa inay:

- Helaan shaqo ku-meelayn, intii suurtagal ahaba. Dugsigu, si kastaba wuxuu awoodaa inuu caawiyo ardayga.
- Soo buuxiyaan foomka Diyaarinta Waayo-aragnimada Shaqada una soo-celi si degdeg ah dugsiga.
- Ka-hor Waayo-aragnimada shaqada, inay soo buuxiyaan qaybaha ku habboon ee safe@work occupational health and safety. Ardaydu waxay qaadanayaan shahaadooyin.
- U dhaqmaan sidii qof shaqaale ah inta uu ku jiro shaqo ku-meelaynta, kuna dhaqmo xeerarka iyo awaamirta goobta shaqada ee ka imaanaysa kormeerahooda.
- Xusuustaan inta lagu jiro Waayo-aragnimada Shaqada ardaydu inay ka wakiil yihiin dugsigooda, sidaas darteed qorsheyaasha iyo anshaxa asluubta dugsiga ay jirayaan mar kasta.
- Dhammaystiraan howlaha uu qorsheeyey dugsigu inta lagu jiro shaqo ku-meelaynta.
- Fahmaan in shaqo ku-meelayntu ay ku jiraan macluumaad qarsoodi iyo xasaasiyadba leh kuwaas oo ay tahay in la ilaaliyo gaarnimadooda.
- Fahmaan in dhammaan qalabka xafiiska, isticmaalka taleefanka, intarneedka iyo koobi-garaynta inay yihiin oo keliya ujeeddooyin shaqo.
- Soo-xidhaan kabaha/dharka/labiska sida uu doonayo loo-shaqeeyuhu.
- War-celin ka dalbadaan loo-shaqeeyaha markay dhammaato shaqo k-meelayntu una mahad-celi.

## Lacag-qaadashada

Heerka ugu hooseeya lacagaha qaadashada ardaydu waa $5 maalintiiba.

Ardayda lacag ma qaadanayaan haddii shaqo ku-meelayntoodu tahay Wasaaradaha Commonwealth ama haya'd lagu sameeyey Sharciga Commonwealth, haya'd waxbarasho, mid samafal ama daryeelka bulshada ee haya'daha aan faai'do doonka ahayn.

## Ardayda leh iimaha

Ardayda leh iimaha way badsan karaan ku-qorista shaqada Waayo-aragnimada shaqada haddii sidaas lagu go'aamiyobarnaamijkooda waxbarasho ee shaqsiga ah, waqti-dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo horumariyo xirfado gaar ah.

## Waa maxay waajibaadka loo-shaqeeyeyaasha?

Sida shaqaalaha kale, ardaydu waxaa ilaalinaya sharciyada dowlad-goboleedka iyo kuwa federaalka ku saabsan goobta-shaqada amaanka ah kana caagan takoorka. Goobaha-shaqada waa inay ku dhaqmaan dhammaan qawaaniinta caafimaadka iyo amaanka shaqada waxayna bixiyaan tababar horudhac ah iyo kormeerka buuxa ee ilmahaaga. Tababarka iyo kormeerkuba waa inay la xiriiraan howlaha ilmahaaga laga filayo inuu indha-indheeyo ama uu qabto inta uu ku jiro shaqo ku-meelaynta. Haddii uu ilmahaagu dhaawacmo inta uu ku jiro shaqo ku-meelaynta, loo-shaqeeyuhu waa inuu kula soo xiriiraa ama weliga ilmaha, iyo dugsigaba sida ugu dhaqsaha badan.

## Waayo-aragnimada shaqada

*'Shaqo barashada'*

Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xiriir dugsigaaga degaanka.